

Degmada King County waxay uga mahadcelineysaa Sharci dejinta taageerada joogtada ah ee ay siinayaan caruurta qaba naafonimada ama dib u udhaca koriinka, shakhsiyaadka qaba naafonimada xagga caqliga iyo koritaanka ah (I/DD), iyo qoysaskooda.

Si loo tirtiro kala duwanannshaha isla markaana loo xaqiijiyo inla meel mariyo taageerooyinka dhaqanka iyo luuqada si loogu adeego dadyowga kala duwan ee King County, waxaan ka codsaneynaa sharci dejiyayaasha inay isticmaalaan qaab caddaaladeed oo u siman jinsiyada, bulshada, iyo dhaqaalaha marka ay dejinayaan siyaasaddaha.

Ilaali oo Difaac Shabakada Badbaadada ee Shaqsiyaadka Naafada ah inta ay Noolyihiin

Talaabooyinka lagu taliyay:

- Joogteynta shuruudaha u-qalmitaanka hadda jirta ee adeegyada ay bixiyaan Maamulka Adeegyada Naafonimada Koritaanka (DDA) si loo xaqiijiyo in dadka qaba I/DD ay sii wadaan helitaanka adeegyada Gobolka ee Medicaid iyo Ka-dhaafitaanka oo ay ku jiraan shaqaaleysiinta, ka mid noqoshada bulshada, nasinta, daryeelka shakhsi ahaaneed, iyo adeegyada deganaanshaha.
- Joogteynta adeegyada turjubaanka ee ay bixiyaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka (HCA), oo ay ku jiraan adeegyada tarjumaadda fiidiyowga ah si loo xaqiijiyo in si wax ku ool ah adeegyada muhiimka ah loo gaarsiiyo bulshadaas.

Iyadoo ujeedku yahay keydinta kharashka, DDA waxay soo jeedisay in isbeddelo lagu sameeyo heerarka u-qalmaya si loo yareeyo tirada shaqsiyaadka helaya adeegyada kharashkooda la bixiyey DDA ee gobolka oo dhan ah. Qiyaastii 2,430 qof oo ku nool King County ayaa saameyn ka soo gaari doonta, iyadoo qiyaastii 875 qof ay halis ugu jiraan inay waayaan shaqo ama adeegyada ka mid noqoshada bulshada. Adeegyada Ka-dhaafitaanka Medicaid ee DDA waxay lagama maarmaan u yihiin si loo ilaaliyo caafimaadka aasaasiga ah, amniga, iyo tayada nolosha. Saamaynta isbeddelada u qalmitaanka waxaa ka mid noqon kara korodh ku yimaada isticmaalka adeegyada xaaladaha degdegga ah iyo isbitaalada, taas oo kordhinaysa kharashyada gobolada kale iyo barnaamijyada deegaanka laga maalgeliyo iyo baabi'inta kaabayaasha adeegga I/DD ee hadda ka jira gobolka oo dhan.

Adeegyada turjubaanka HCA waxay muhiim u yihiin dadka u qalma kaarka caafimaadka, dadka luuqadda ku kala duwan inay si siman u helaan adeegyada muhiimka ah. Qiyaastii boqolkiiba 27 qoysaska isticmaala Caawimaada Hore ee loogu talagalay Dhallaanka iyo Socod-baradka waxay u baahan yihiin tarjumaadda fiidiyowga ah taasoo u oggolaanaysa qoyska, adeeg bixiyaha, iyo turjubaanka inay ku kala sugnaadaan goobo kala duwan si loo helo adeegyo wax ku ool ah.

Maalgelinta Shaqaaleynta iyo Guriyeyn loogu talagalay Dadka Naafada ah si loo Taageero Soo Kabashada Dhaqaalaha

Tallaabooyinka lagu taliyay:

- Ilaalinta maalgelinta shaqaalaynta iyo xaqiijinta dhamaan ardayda u qalma DDA ee ka baxaya dugsiga sare sanadka 2021-2023 in lagu daro Adeegyada Ka-dhaafitaanka Qorshaha (Basic Plus Waiver) si ay u helaan shaqo iyo adeegyada kale ee loo baahan yahay.
- Kordhinta bixinta guryo qiimahooda la awoodi karo, oo ay ku jiraan guryaha loogu talagalay shaqsiyaadka qaba I/DD iyo qoysaskooda, iyada oo loo marayo maalgashiyo ay ka mid yihiin \$250 milyan oo loogu talagalay Lacagaha Amaanada Guriyeynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir:

Celia Jackson, Xafiiska Maamulka Sare ee King County
cjackson@kingcounty.gov / 206-263-4195

Mac Nicholson, Golaha Deegaanka ee Degmada Metropolitan King
Mac.Nicholson@kingcounty.gov / 206-477-7908

Siyaasadda Koowaad ee Shaqaalaynta Gobolka Washington waxay xaqiijinaysaa in dadka qaba I/DD ay fursad u helaan inay shaqeeyaan. Adeegyada shaqaalaynta waxay u oggolaanayaan dadka qaba I/DD inay ka qaybqaataan bixinta adeegyada muhiimka ah ee bulshadooda iyo inay gacan ka geystaan sii wadista dadaallada Washington ee ku aadan dib-u-dhiska dhaqaalaheeda. Si loo sii wado tabarucaadka dadka qaba I/DD ee ay ku biiriyaan shaqaalaha, maalgashiyada gobolka ee waxbarashada gaarka ah waa inay xaqiijiyaan ardayda ka baxaysa dugsiga sare inay helaan adeegyo shaqo. Dhamaan dadka naafada ah waa in sidoo kale la siiyo mushaharka ugu yar ama wax ka sareeya.

Intaa waxaa dheer, maalgashiyo dheeraad ah oo ku aadan xulashooyinka guryaha iyo adeegyada guryaha ee taageerada leh ayaa loo baahan yahay. Guri qiimahiisa la awoodi karo oo la isticmaali karo ayaa lagama maarmaan u ah in dadka naafada ah ay awood u helaan inay gacan ka geystaan bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaanba inay wax ku biiriyaan bulshada ay ku nool yihiin.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir:

Celia Jackson, Xafiiska Maamulka Sare ee King County
cjackson@kingcounty.gov / 206-263-4195

Mac Nicholson, Golaha Deegaanka ee Degmada Metropolitan King
Mac.Nicholson@kingcounty.gov / 206-477-7908